# Kasoo caariyayso qalabka ciyaaraha, dheesha iyo nashaadaadka banaanka gabi ahaanba si bilaash ah shabakada BUA

BUA waxay u taagan tahay Barn-Unge-Aktivitet (Nashaadada Carruurta iyo Dhalinta) waana urur khayri ah oo ka shaqeeya u fududaynta carruurta iyo kurayda si gaar ah inay caariyaystaan qalabka jimicsiga jirka, sida ciyaaraha iyo nashaadaadka banaanka.

Barnaamijka BUA waa "maktabad qalab" oo dhallinyarada iyo waayeelka ay si isku mid ah uga amaahan karaan qalabka ciyaaraha, ciyaarta iyo nashaadaadka banaanka gabi ahaanba si bilaash ah. BUA waxaa ugu horeyn loogu talogalay carruurta iyo dhallinyarada, laakiin qof kasta oo dagan Norway lehna lambarka moobilka Norway ayaa amaahan kara qalabka.

BUA waxay u shaqaysa si la mid ah sida maktabadda, laakiin waxay dadka amaahisaa qalabka isboortiga iyo nashaadaadka banaanka halkii ay ka soo amaahan lahaayeen buugaagta. Qalabka inta badan waxaa la amaahan karaa halkii isbuucba mar. Haddii aad meel aadayso oo aad u baahato inaad qalabka amaahdo muddo dheer, si fudud u weydii waaxda BUA ee degmadaada.

**"Galka amaahda" ayaa loo baahan yahay si loo amaahdo qalabka iyada oo loo marayo shabakadda BUA**

Qof kasta oo degaan Norway haystana lambarka taleefanka gacanta ee Norway wuxuu galka amaahda ku samaynsan karaa bogga oonlaynka ah ee BUA. Laantaada BUA ee maxaliga ah ayaa sidoo kale diyaar u ah inay kaa caawiso furashada galka daynta. Dalxiiseyaasha shisheeye iyo ganacsiyada ayaan amaahan karin qalabka BUA ee bilaashka ah. Qoxootiyaasha aan haysan lambarka moobilka Norway ayaa furan kara ciwaanka martida ayagoo tagaaya laanta BUA si toos ah. Qaar ka mid ah ardayda ajaaniibta ah iyo shaqaalaha martida ah ayaa sidoo kale qalabka ka amaahan kara qeybo ka mid ah laamaha BUA, laakiin tani ma khuseyso dadka oo dhan. Ka fiiri webseedyada maxaliga ah ee barta BUA si aad u hesho shuruudaha laan kasta.

**Qof wayn waa inuu masuul ka yahay amaahna**

Carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 18 sano way ka amaahan karaan shabakadda BUA, laakiin qof qaangaar ah waa inuu masuul ka noqdaa amaahda. Qofka wayn waa inuu sameeyaa galka amaahda uuna ku daraa ilmaha yaryar oo ah amaahdeyaal kula jira galka oo ku hoos qoran magaciisa. Amaahdeyaasha wadajirka ah ee kayar 18 sano waa in lagu daraa lambarkooda moobilka iyo ciwaanka iimeelka. Carruurta aan lahayn ciwaan iimeel iyo lambarka taleefanka ayaa ku qaadan kara amaahda galka amaahda ee waalidkood, marka la xaqiijiyo in waalidkood uu ko baxsho ogolaansho qoraal ah qaybta Qoraalka ee galkiisa.

Halkaan ka furo galka daynka

**Furo galka amaahda ee BUA ama ka furo barta BUA: www.bua.no**

Marka aad furato galka amaahda, waa inaad ku xaqiijisaa xogtaada gaarka ah Vipps. Haddii aadan haysan Vipps, waxaad xaqiijin kartaa lambarka taleefanka gacanta iyo cinwaanka emailkaaga adoo helaaya koodh keenaayana cadaynta aqoonsiga laanta BUA marka koobaad ee aad qalab amaahanayso. Marka aad furato galka amaahda ee shabakada BUA, waxaad aqbalaysaa shuruudaha amaahda ee shabakada BUA waxaadna aqbalaysaa inaan kaydin karno xogtaada gaarka ah.

Waxa keliya ee aad samaynayso waa inaad sheegto lambarkaaga moobilka marka aad amaahanayso qalab. Lambarkaaga moobilka ayaa noqonaaya aqoonsigaaga. Wax kasta oo adiga iyo ilmahaagu amaahataan ayaa la diiwaan gelin doonaa, waxaana risiidka laguugu soo dirayaa iimeelka. Waxaad geli kartaa galkaaga marka aad doonto waxaadna arki kartaa xogta wax kasta oo lagu amaahday magacaaga.

**Barta oonlaynka BUA waa www.bua.no**

Waxaad ka helaysaa faahfaahinta dhammaan barnaamijyada qalabka shabakada BUA barta oonlaynka ah. Laan kasta oo kamid ah BUA ayaa leh webseed maxali ah, halkaas oo aad ka helayso guudmarka xogta saacadaha shaqada, ciwaanka, xogta xariirka iyo xeerar kasta oo maxali ah. Waxaad sidoo kale geli kartaa qaybta "Hel qalabka" si aad u aragto qalabka aad amaahan karto, iyo sidoo kale xajmiyada, tirada iyo helitaanka.

**Mudaysiga qalabka**

Laamaha BUA ee leh astaanta barbolka ah ee gudaha qariirada barta oonlaynka ah ayaa keliya lagu baxshaa amaahaha qofku u yimaado, taasoo ka dhigan inaadan mudaysan karin qalabka, laakiin ay tahay inaad toos u tagto laanta inta lagu jiro saacadaha shaqada si loo amaahdo qalabka. Liiska qalabka iyo helitaanka waxaad ka arki kartaa bogga internetka ee maxaliga ah, laakiin halkaas qalab kuma kaydsan kartid.

Laamaha BUA oo leh calaamad cas oo ku astaysan khariidada guud ee boggan waxay bixiyaan qalab oonlaynka laga kaydsan karo. Qalabka ayaala kaydsan karaa inta u dhexaysa 14 iyo 2 maalmood kahor intaadan amaahan, waxaad amaah u haysan kartaa qalabka ilaa 7 maalmood.

**Maxaa dhacaaya haddii heshiiska amaahda la jebiyo**

Waa muhiim inaad ilaalisaa qalabka aad amaahato aadna kusoo celisaa waqtigii lagu heshiiyay. Haddii qalabku jabo ama la xado, adiga ayaa mas'uul ka noqon kara. Tani ma khuseyso murmuruxa iyo jeexitaanka caadiga ah, sida cirif jaban ama xoqid.

BUA®

www.bua.no

**Amaaho wax kasta oo aad doonayso**
*ugu socoto, ugu dabaalato, ugu sidbato, ugu socoto barafka, buuraha ugu fuuso, ugu korto meel, ugu laalacshoowdo, ugu boodo, ugu warega cadayso, ugu raqlayso ama ugu wiifoowdo*

BUA®

www.bua.no